

## Talooyinka Shaqo-taariikheedka



Aan kugu hagno habraaca.

### ✓ Waxa ay tahay inaad samayso

- Ku dar macluumaaadka khuseeya shaqada aad codsanayso oo xoogga saar xirfadahaaga.
- Adeegso erezada muhiimka ah ee ku qoran xayasiinta shaqada sharraxaada gudaha shaqo-taariikheedkaaga.
- Ku dar xaaladdaada shaqo ee hadda: meesha aad ka shaqeysyo, illaa inta aad ka shaqeynaysay halkaa, waajibaadka iyo/ama guulaha.
- Ku dar macluumaaadkaaga waxbarasho.
- U qor shaqo-taariikheedkaaga sida ay u kala dambeeyeen, adigoo ku billaabaya jagadii ugu dambaysay.
- Ku qor magacaaga iyo macluumaaadkaaga xiriirkha meel ay si cad uga muuqan karaan. Tani waa inay ku jiraan magacaaga oo buuxa, cinwaankaaga, lambarka taleefanka, iyo iimaylkaaga.
- Soo koob (aan ka badnayn 1-2 bog).
- Iisticmaal 8.5" x 11" cabbirkeeda yahay oo ha u qornaato qaab soo jiidasho leh.
- Had iyo jeer ku dar warqad xog-koobid ah markaad boosto ama iimayl ku direyso shaqo-taariikheedkaaga.  
Waxaad ku dhex qori kartaa iimaylkaaga.
- U khaas yeel shaqo-taariikheedkaaga shaqo kasta oo furan.



### Waxa ay tahay inaad samayn

- Ha isticmaalin soo gaabinta (waxaa ka reeban soo gaabinta magaca dhexe iyo tilmaamaha sida W ee tilmaamaysa Waqooyiga ee gudaha cinwaanka).
- Ha sheegin filashooyinkaaga mushaharka ama taariikhdaada mushaharka. Haddii lagu weydiyo, sug ilaa aad ka dirayso warqadda xog-koobidda ama xilliga wareysiga.
- Ha isticmaalin xarfo qurxineed maalayacni ah, jaldiyeeyo ama warqad khaas ah.
- Ha dirin sawirkaaga.
- Ha ku darin macluumaaadka shakhsiyeed (da'da, dhererka, miisaanka, heerka qoyska, sawirka, ama diin ama siyaasadeed) haddii aadan shaqo ka codsanayn mid ka mid ah ururadaas.
- Ha ku magacaabin faylkaaga shaqo-taariikheedka "shaqo-taariikheed." Magacaaga ku qor.
- Ha ku darin tixraacyada shaqo-taariikheedka. Samee liis gaar ah oo tixraacyo ah.
- Ha ku darin hiwaayadaha ama danaha bulsheed haddii aynan wax ku kordhinayn u qalmiddaada shaqo.
- Ha isku dhagin, sharootayn ama laabin shaqo-taariikheedkaaga.

Wixii macluumaaad dheeraad ah kala Xiriir:

### Maine CareerCenters



[www.mainecareercenter.gov](http://www.mainecareercenter.gov)



[MaineDOL.CareerCenter@maine.gov](mailto:MaineDOL.CareerCenter@maine.gov)



207-623-7981 | TTY users call Maine Relay 711



Waaxda Shaqada ee Maine waxay bixisa fursad loo siman yahay ee xagga shaqada iyo barnaamijyada. Kaalmooyinka iyo adeegyada dheeraadka ah ayaa diyar u ah shakhsiyadka naafada ah haddii la codsado.